ayaa laga siin doonaa laba targooyin caadi ah oo cusub hay'adda liiskanka.

TALLAABO 5—

Haddii qofka baabuurka lehi u geeriyoodo oo baabuurku wali yahay milkiyadda qofka oo wali aan la wareejin dhaxal ahaan si sharci ah, Maamule Wax-ka-qabte hanti ayaa laga yaabaa in u dib uga diiwaangaliyo, illaa laba wareegto diiwaangalinno ah qofka geeriyooday, hay'adda Diiwaan-galiye ku-Xigeenka liisan.

Haddii aan wali lahaanta baabuur aan lagu wareejin afada/seyga ka haray qofka geeriyooday, oo cusbooneysiinta diiwaangalinu wali ku jirto gacanta qofka geeriyooday, qofka Dhaxal -fulinta Maamulaya waa in uu isticmaalaa lambarkiisa/keeda Sooshal Sekuuriti marka u saxiixayo arjiga, weedha mas'uuliyadda lacageed. Ka dib laba wareegto cusbooneysiin (inta ugu badan) baabuurka waa in lagu wareejiyaa lahaansha ahaaan magaca qofka cusub ee leh.

FG: TAARGOOYIN GAAR AH OO LOO SOO SAARO SI TIRO XADDIDAN AH AYAA KALIYA LAGU NIDAAM SOCODSIINAYAAGOOBTABMV EE KU TAAL COLUMBUS. KA WAREYSO DIIWAAN-GALIYE KU-XIGEENKA AGAGAARKAAGA TAARGOOYINKA NOOCAN OO KALE AH. SI AAD U HESHID MACLUUMAAD DHEERAAD AH, FADALAN U WAC (614) 752-7800.

Iyada oo Kooban

Marka aad u diyaar-garoobeyso dajinta arrimaha dhaxalka hantida ee xubinta qoysakaaga ama qof aad saaxibbo tihiin, waa inaad dareentaa kalsooni oo aad ogaataa in shaqaalaha Xafiiska Baabuurta ee Ohio iyo Karaaniyada Xafiiska Maxkamadda Hanti Lahaanshaha ay kugu garab taagan yihiin oo diyaar u yihiin inay kuu caawiyaan si kasta oo suurtogal ah.

www.bmv.ohio.gov

OHIO DEPARTMENT OF PUBLIC SAFETY
EDUCATION • SERVICE • PROTECTION

WWW.PUBLICSAFETY.OHIO.GOV

Waaxda Badbaadada Dadweynaha
P.O. Box 182081
Columbus, Ohio 43218-2081

BMV 3720 5/10

HAGAHA XAFIISKA BAABUURTA EE LOOGU-TALAGALAY AFADA/SEYGA, XUBNAHA QOYSKA IYO ASXAABTA QOFKA GEERIYOODAY

Waraaqdan ayaa ku caawin doonta marka aad ka wareejineyso baabuur lahaan ka kasta oo uu lahaa sey/afo geeriyoodey.

Sideen Anigu u Wareejiyaa Baabuur Lahaanshaha Qofka Geeriyooday?

Waa kuwan sida loo wareejiyo Shahaadada Lahaanshaada:

TALLAABO 1—

Marka u geeriyoodo qof deggane gobol ah oo lahaa ugu yaraan hal baabuur, lahaanshaha seyga/afada geeriyooday illaa laba baabuur oo aan lagu wareejin afada/seyga ka haray qofka geeriyooday iyada oo sababtu tahay wada lahaansho awgeed oo xaq u lahaanta ka-haritaan lagu dajiyey qodobka 2131.12 ee Xeerka Dib-loogu Noqday, ee aan lagu wareejin ahaan dhaxal-helaha wareejin-geeri ee lagu tilmaamay iyada oo hoos imaneysa qodobka 2131.13 ee Xeerka Dib-loogu Noqday, oo hase yeeshee si gaar ah aan lagu bixin go'aamin maxkameed markhaati lahayd ayaa u xulan karaa qofka ka haray qofka geeriyooday. Lahaanshan ayaa isla markaaba dhaxal u noqonaya afada/seyga haray marka la wareejiyo lahaanshaha ama lahaanshaha(yaasha) iyada oo la raacayo qodobka 4505.10 ee Xeerka dib-loogu Noqday. Wadarta qiimaha baabuurta u xushay afada/seyga haray markay hoos timaad qaybtan, ee lagu cayimyey dhaarta qoran ee ah in u afada/seyga u fuliyo dhaxasha iyada oo raacaysa qaybta (B) ee qodobka 4505.10 ee Xeerka dib-loogu Noqday, ayaan ka badaneyn $40,000.

Baabuurta marka la leeyahay waxa ku jira mootada iyo taraagga hadddii taraagga u qofka geeriyooday u isticmaali jiray xammuul ama qoysaka afada/seyga markuu qofkaasi noolaa.

Afada/seyga ka haray qofka dhinta ayaa ka codsan dhaarasho qoran Karaaniyada Maxkamadda Xafiiska Lahaanshaha. Dhaarashadan qoran ayaa u baahan:

a) Qiyaasta qiimaha ugu dhow ee baabuurka(ta)
b) Sannadka
c) lambarka aqoonsiga baabuurka
d) Sameyska
e) Moodelka
f) Nooca qalfoofta
g) Shahaadada lambardooda Lahaansho ee Ohio

U gee dukumentiyada (Lahaanshaha asalka ah, shahaadada dhimashada iyo dhaarashada qoran) Xafiiska Karaaniga Maxkamadaha kaawntiga.

TALLAABO 2—

Ku wareejinta lahaanshaha ayaa ku socon doonta arjiga lahaanshaha ee u ku codsado afad/seyga ka haray qofka geeriyooday ee u kaga codsanayo Xafiiska Karaaniga Maxkamadaha ee Lahaanshaha. Wareejiskan ayaa sameyn ku lahayn deymaha lagu leeyahay baabuurka(ta). Haddii deyni jirto, horaa loogu sii wadayaa lahaanshaha.

Ujirada lahaanshaha waa $15.00 oo ay ku biirto ujirada nootaayda.

Marka ay jiraan Dardaaran Sharicyeysan/ Hanti

TALLAABO 1—

Marka ay jirto hanti (estate) oo dardaarn qoran oo sharciyeysan jiro, lagana dhaxal-galiyo mxkamadaha , qofka dhaxal-fuliyaha la magacaabay ayaa wakiil ka noqonaya wareejinta lahaanshaha baabuurka(ta).

TALLAABO 2—

Dhaxal-fuliyaha ayaa haysan doona nuqul ah dokumentiga sharcigu-guddoonsiyey oo tusaya ahaanta dhaxal-fulinta. Isaga/Iyada ayaa siin doona dokumentiga lahaanshaha Ohio ee sida habboon loo meeleeyey qofka dhaxalka u leh ama qofka iibsanaya. Daxal helaha ama qofka iibsada aya markaa geyn kara Lahaanshaha Ohio iyo nuqulka waraaqda ballanta ama dukumentiyada sida kolba looga baahan yahay kaawntiga, Xafiiska Karaaniga Maxkamadaha kaawntiga. Fadalan ka wareyso Xafiiska Karaaniga Maxkamadaha kaawntigaaaga waxayaabaha loo baahan yahay.

Marka ayna Jirin Dardaaran Qoran oo Sharciyeysan

TALLAABO 1—

Marka ayna jirin dardaaran qoran oo sharciyeysan, qofka dhaxasha xaqa u leh waa inuu tagaa Maxkamadda Daxalka oo ka soo qaataa foom loo yaqaan " Ka Sii-Deynta Maamulka oo Wadata Awoodda ku Wareejinta."

Tallaabo 2—

Qofka wax dhaxlayaa ayaa ah in u geeyo foomka sii-deynta (qofka oo qoraya qeexitaanka buuxa ee baabuurka iyo magac qofka lagu wareeginayo) iyo Shahaadada Ohio dokumentiga Lahaanshaha oo orijinaal ah Xafiiska Lahaaanshaha Karaaniga Maxkamadda Kaawntiga sidii loo wareejin lahaa lahaanshaha baabuurka.

SIDEEN ANIGU UGU WACAA XAFIISKA LAHAAANSHAHA KARAANIGA MAXKAMADDA KAAWNTIGA?

Xaalado kasta oo wareejinta lahaanshaha, afada/seyga haray, dhaxal-fuliyaha ama maamulha ayaa ah in u la xiriiro Xafiiska Lahaaanshaha Karaaniga Maxkamadda Kaawntiga sidii uu u heli lahaa macluumaad dheeraad ah ama gacan-qabasho.

Taleefan lambarda Xafiiska Lahaaanshaha Karaaniga Maxkamadda ayaa ku qoran qaybta dawladda ee buugga taleefanka (Bogagga Cad). Mararka qaarkood, waxay ugu hoos qoran yihiin qaybta kaawntiga sidan "Waaxda Lahaanshaha Baabuurta." Goobaha qaarkood, xafiiska lahaanshaha ayaa ku yaal maxkamadda. Haddii u buugga taleefanku u liis gareynayo liisaska lambarka maxkamadda, u wac maxkamadda oo obareetaka u sheeg inaad rabto Xafiiska Karaaniga Maxkamadda ee Lahaaanshaha. Waliba, waxaad ka heli kartaa lambarda barta internetka ee ah www.bmv.ohio.gov, ee hoosteeda ah "Macluumaadka Lahaanshaha ee Goobaha Laanta Xafiis."

Maxaa laga yeelayaa Diiwaan-Galinta?

TALLAABO 1—

Ka-dib marka lahaanshaha lagu wareejiyo magaca afada/seyga ka haray qofka geeriyooday, waa in u afada/seyga haray u geeyaa lahaanshaha cusub hay'ad diiwaan-galiye ku xigeen liisan.

TALLAABO 2—

Marka la joogo hay'adda liisanka, arjiga diiwan-galinta waa in la raaciyaa ujro adeeg ah $3.50, ujro wareejin ah $1.00 iyo Shahaadada Lahaanshaha cusub ee la wareejiyey.

TALLAABO 3—

Marka sida habboon loo fayl gareeyo, ku xigeenka diiwaan-galiye ayaa bixin doona shahaado diiwaan-galin oo magaca afada/seyga haray ku yaal.

TALLAABO 4—

Maadaamaa ay lahaanshaha iyo diiwaan-galintuba hadda leeyihiin magaca afada/seyga, taargooyinka ayaa ku oolli doona baabuurka oo waxay noqon doonaan mas'uuliyadda afada/seyga haray. Haddii ayan jirin afo/sey ka haray qofka geeriyooday, qofka cusub ee leh